Kitaab Zifatu Salaat
Qaybta Labaad

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين نبينا محمد وعلى آله وصحبه أجمعين

Mahad oo dhan Alaah iska leh Rabiga caalam ka abuurey Allaha ha amaano nabigeena sharafta badnaay anbiyada kan ugu fadliga badan&anbiyada lasoo direy dhamaantood

Muqadamada Kitaabka & Qoraaga Kitaabka

Kitaabka SifatuSalaat : Waxaa iska leh **Sh.*Maxamed Naasiru Diin Ibnu Nuux Ibnu Aadam Ibnu Najaasi*** *Kunyadiisa waa* ***abuu cabdiraxmaan*** *Dhalashadiisa waa albaaniyees carab maahin. Magaalo layiraahdo* ***iskuuldara*** *oo caasimad albaaniya u ahayd marki danbe caasimada waa laga wareejiyey caasimadii sanadkii* ***1914 /1332*** *H*:

Yaraantiisii Sh.Albaani : *Sheekha isagoo yar cimrigiisa 9 jir meelas yahay ayaa wadanka albaaniya waxaa qabsadey nin layiraahdo axmed surquub wuxuuna isku dayey wadankii dhan inuu dhalan gadiyo oo nidaam cilamaniya iyo diin la"aan wadanka kudhaqo ayaa sh.albaani aabihii nuux oo nin caalim ah oo fiqiga xanbaliga aad u yaqaana ayaa wuxuu dareemay in xaalka wadanka fiicnayn oo diintiisa labaxsado oo uu hijroodo marka sh.albaani aabihiis wuxuu kutubada ku arki jirey in axaadiista oo aad u amaantey wadanka shaam (waa* ***urdun*** *iyo* ***siiriya*** *iyo* ***falastiin****) sidaasuuu ku soo hijroodey sh.albaani aabihiis . Sh.alaabi isagoo 9 jir ayaa suuriya la keenay qaasatan dimishiq halkaasuu ku korey laakiin dhalasho ahan wuxuu kasoo jeeda wadanka albaaniya.*

Sh.Albaani wuxuu leeyahay anigoo 9jir ayaan imid dimishiq oo aan aqoonin luuqada carabiga qorid iyo akhrintaba markaasuu galey madarso ibtidaai ah (dugsi hoose oo bilow ah) markuu dhamaystey ayaa aabihiis oo sh.nuux ah ayaa la qumanaaytey inuu ka wareejiyo madarsadaan oo waxbarasha ah dusihoose ,dhexe ,sare ,jaamacad ayuu go"aansaey in uu kawareejiyo maadam aabihiis sheekh ahaay una wareejiyo wiilkiisa sh.albaani masaajida iyo culimada cilmiga ka barto (meelaha ugu wanagasan cilmiga sharciga laga barto waa masaajida laakin maantey masaajida qaar duruusta looma ogola) Sh.Albaani wuxuu leeyahay maalinkaas hadii aabahay madasarada iga saari lahayn cilmigaan maantey aan bartey maan baranlahayn oo

hawlo aduunyo ayaan iska gali lahaay laakiin alaah ku mahadsan oo aabahayna waafijiyey in cilmiga sharciga iidooro.

Sh.albaani *aabihiis ayuu ahaay qofka ugu horeeyey cilmiga ku dul akhriyey wuxuu kabartey fiqiga xanafiga ah (suuriyiinta waa xanafiyiin & albaaniya) iyo cilmiga sarfiga ah & culimo kale ayuu wax kabartey iyowuxuu kale la madaxbanaanaadeey cilmiga barashadiisa & doonikaankiisa wuxuu kaloo ka faaideystey maktabad dimish ku taalo layiraahdo* ***aldaahiriyah*** *waana makktabadaha ugu caansan caalamka maanta waxaa yaala wixii macluumaad kutubo laqorey waqtidheer ayaa la aas aasey halkaas ka faa"ideystey sh.albaani wuxuu leeyahay fariska kutubta wax lagu baaro anigaa dajiyey maktabdaas*
kadib jaamacada ayuu macalin ka noqdey ***jaamacada madiina Almunawar*** *mudo* ***3****sano ah wuxuu dhigayey cilmiga xadiiska oo ardey badan ka faa"ideysatey.*

Xaasaaskiisa &Caruurtiisa Sh.Albaani.

Waxaa uu guursadey **4** (afar) xaas caruur ahaan waxay udhaleen **14** caruur ah
Juhdigiisa & dadaalkiisa sheekha waa naadir waxaad ka garankartaa in kutubktiisa la aruuriyo majaladu Al-saala oo labo majaladood ah oo isku xiga **21** iyo **22** ah waxay ardeydiisa ku sheegeen sheekha kutubta uu qorey **218** Kitaab oo qaar qorey qaar takhrijiyey kuligioodna waa cilmiga xadiiska (fiqiga xadiiska) casriga ninkii ummada ku badbaadiyey Rasuulkeena wuxuu yiri رسُول الله صلى الله عليه وسلم **100** sano qofbuu ummaadaan usoo saaraa oo ilaahay diintooda ku ilaasho.

>**Sh.Albaani** Raxmatulaahi waxaan tacriif laga bixin sheekha kitaabka qorey Sheekha magaciisa waa ***Sheekh Maxamed Naasiru Diin Ibnu Nuux Ibnu Aadam Ibnu Najasi Albaani*** ku magaca dheer dimishiqiyo ku korey kuna dhintey magaalada dimishiq ee ku taala wadanka suuriya (urduniye) aabihii wuxuu kala soo hijroodey wadanka albaani kuna taala yurubta bari waagii la oran jirey yuguslaafiya .

>**Hijraddii Waalidkii Sh.Albaani** :wadanka urdun wuxuu ku barbaarey halakaas
> Sh.Albaani : Wuxuu ku dhashay wadanka albaaniya magalada Caasimada albaaniya magaceeda ladhaho wuxuuna dhashay sanadkii 1914 Miilaadiga waa faqsan 1332H wuxuu ahaa y nin muxadith oo

diinta islaamka aad u fahansan dadaka ugu yeera kitaabka iyo sunnada jidkii mareen dadkii salafusaalix iyo intii xaqa ku raacdey iyaga iyo aimadooda .

> Sh.Albaani Aabihiis: Wuxuu kamid ahaay culimadda waaweyn ee madhabka Xanifiyadda oo aad u yaqaaney madhabka xanifiyadda wuxuu usoo haajirey wadankaan suuriya (Dimishiq) markey dhibeen xukunkii Cilmaaniga ahaay ee ka jirey wadanka Albaaniya boqorka haystey waxaa laoran jrey axmed surquub nin dhibana ayuu ahaay oo muslimiinta dhibay marka sh.alaabi aabihiis wuxuu ahaay nin cilmibadan markaas ayuu caruurtiisa oo dhan lasoo ahaajirey caruurtiisa waxaa ka mid ahaay sh.maxame naasirudiin albaani oo markaas wiil yar ahaay sh.albaani aabihiis wuxuu la soo cararey diintiisa waa hijro ilaahy dartiisa marka qofka muslinka waxaa waajib ku ah in diintiisa kala carraro meel alle meeshii dhib loogu geysto.

Barashada Cilmiga

Sh.albaani wuxuu cilmiga ku dul akhriyey aabihiisa ilaahay wuxuu jecleysiiyey cilmiga xadiiska ilaa **50** sano uu joogey wadanka dimishiq sh.albaani laftiisa waa la dhibey wuxuuna u haajirey wadanka Urdun magaaladiisa Cumaan halkaas waqtigiisa ku dhamaystey ilaa ku dhintey halkaas isagoo caalima ah oo dadka diinta baraayo kitaabada uu qorey lama soo koobi karo sheekha xita iska daayee gurikasta ay gashey iyo maktabadaha dhamaan iskaba daa qofkastoo diinta baranaayo kama maarmo kitaabadiisa ummada dhan ayaa aqbashey.

>Sh.Albaani Raxmatulaahi waxaana amaaney culi badan oo muslimiinta kamid ah waxaa ka mid aha culimadda waaweyn Sh.Cabdulcaziiz Ibnu Baaz Raxmatulaahi & Sh.Maxamed Ibnu Saalix Ibnu Cutheymiin iyo Sh.Cabdulcaziiz Aala sheekh muftiga oo qabtey booskii ibnu baaz ardeydiisa sheekha aad bey u fara badantahay lama soo koobi karo qoftoos cilmiga uga qaatey iyo jaamacada oo kale iyo dad kutubadiisa iyo cajaladihiisa ka faa"ideystey sheekha aad baa loo amaaney suhdigiisa Muxadis casrigaas joogey ayuu kamid ah.

Kitaabadda uu Qorey ama Axaadiista saxiixyeelay Qaar kamid ah Sh.Albaani Raxmatulaahi

>Sifatusalaat
>Manaaratusabiil
>Silsilatulxadiis Daciif
>Silsilatulxadiis Saxiix
>Silsilatul Manaarusabiil Irwaaukhaliil
>Tamaaulminah fi kitaab fiqisunnah

>Sunan abiidaau"ad
>Sunan Nisaa"i
>Sunan Ibnumaajah
>Sunan Tirmidi
>Saxiixalmuslim
>Xijaabmaratamuslim
>Jaamac saqiir
>Silsilatulshaamilmaxamdiyah saxiixah
>Takhriij 3aqiidatu Dhaxaawii
>Xukmu taarikasalaat
>Aadaabta Zawaajuzafaafah
>Axkaam Salatuljanaasah
>kalimudhayib
>Kitaab Riyaadusaalixiin Tasxiijin
>Kitaab siiratunabiyah saxiixah
>Kitaab Mishkaat masaabiix
>Tarqiib watarhiib

Geeridiisa (Dhimashidiisa:

Sh.Albaani dacwadda uu wadey kama tegin ilaa uu ka geeriyoodey sheekha wuxuu geeriyoodey maalin sabti ah galabtii qoraxda oo sii dhacaysa **22 jamaadil** aakhira **1420H** {**4 tii oktober 1999**} ayuu geeriyoodey sheekha waxaa lagu tukudey galabnimadii oo uu dhintey isagaana kasii dardaarmey oo yiri hadaan dhinto halay dedejiyo waxaana ku tukudey janaasadii sheekh albaani dad aad u farabadan oo tiradooda dhantahay **5000** (shankun) Sh.alaabni wuxuu ahaay sheekha aad loo jecelyahay raxmatulaahi iyadoo galabtii dhintey islamarkiiba la duugey(bacdal Casar) ayaad waxaad arkeysaa in dad farabadan janaazadiisa kasoo qaygaleen.waa sida ardeydiisa ku sheegeen risaaladii ay ka qoreen markii dhintey culimadii islaamka dhan ayaa amaaney waxay ku amaaneen dacwadda uu u shaqeeyey waxaan kamid culimadaas **Sh.Cabdulcaziiz Aala sheekh** muftiga oo qabtey booskii **ibnu baaz** **&** **Sh.Maxamed Ibnu Saalix Ibnu Cutheymiin** iyo Culimada islaamka dhamaan waxaana ka helaysa muqadimadaas [**al asaala**] ardeydiisa ay qoreen.Ilaahay waxaan uga baryeeynaa judigiisa Iyo islaamka shaqada uu u qabtey in allaah ugu bedelo jannatul firdoows isaga iyo ehelkiisa & culimadiisa annaga naga dhigo kuwa dhega wadada toosan aamiin yaaraabi marka sheekha waa in loo wada duceeya & culimaa muslimiin.

***** Gabagabada waxaa inoo xiga doonta Kitaabka Muqadamadiisa***

Waxaa Tarjumay Walaalkiin **Cabdiladhiif Aadan**

Akhiizubeyr_1@hotmail.com

هذا والله والله أعلم
لا تنسونى بالدعاء أخوكم زبير_١